# FAAFIN RASMI AH

# الجريدة الرسمية

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadaka 4aad — Muqdisho 1da Dishember 1976 — L.7

*Laana faafinta rasmiga ah oo ka tirsan madaxtooyada*

**FAAFIN BIL SOO BAXA** — جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta


# KOBNIIN

## BOGGA KOOWAAD


SHARCI L. 12 ee 22 Nofember 76 Hay,adda Maqaasiinka Guud ee Dawladda oo laga dhigay Wakaalad Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha). » 121


## BOGGA LABAAD


XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 7 Juunyo 76, *Dallacaad Jaall Gaashaanle Xasana Axmed Imaan oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed L.30* Bogga 126

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. 2 Seteembar 76, *Shaqo ka fadhiisasho Jaalle G. Sare Maxamed Jaamac Belel L. 31* » 127


## BOGGA SADDEXAAD

### TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH


MAXKAMADDA GOBOLKA BANNDIR, 30.11.76, *Lumid Jeegga Wareega ee lamb. 045667, ku qoran 50.000, u leeyahay Cabdullaahi Cali Rooble L. 57* » 128

SHIRKADDA KOJU, KISMAAYO 28.11.76, *ka soo qaybgal Shir L. 58* » 129

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 1.11.76, *lumid Buugga kaydka ah ee Lam. 786 ku qoran Sh. S. 1.200 uu leeyahay Daahir Sulub Ismaaciil L.59* » 130

# BOGGA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 12 ee 22iik Nofember 76 hay'adda Maqaa-*siinka Guud ee Dawladda oo lagu dhigay Wakaalad Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha).*

.ISAGOO ARKAY: Xaashida 1, 2, iyo tar. saddexaad ee Kacaanka 21 Okiitoobar 1969;

IASGOO ARKAY: Sharciga Lam. 17, 18, 19 ee 1dii Luulyo 1976,

ISAGOO ARKAY: Sharciyada Lam. 32 ee 18.3.1972 oo lagu dhisay Hay'adda Maqaasiinka Guud ee Dawladda (Azienda Proveditorato General ledlo Stato) iyo Sharciga Lam. 18 ee 1.2.1973 oo lagu wareejiyey xilka iyo awoodda keenidda iyo qaybinta dalka oo idil alaabta dhismaha;

ISAGOO TIXGELINAYA in hawlaha ay maamusho Hay'adda Maqaasiinka Guud ee dawladda noqotay mid si aad u weyn oo saamaynayo Dalka oo dhan dhiska ka socda, ay tahayna lagama maarmaan in hay'addaas lagu Magacaabo Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha;

ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka ka soo baxay Golaha Siyaasiga iyo Golaha Wasiirada;

WUXUU SOO SAARAYAA:

SHARCIGA SOO SOCDA:

### Qodobka 1aad

Marka laga billaabo 10 Maajo 1972 Hay'adda Maqaasiinka Guud ee Dawladda oo lagu dhisay Sharciga Lam. yahay 32 18 Marso 1872, waxaa laga dhigay Wakaalad waxayna la baxday magaca «Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha». iyadoo darajeedu tahay (B).

### Qodobka 2aad

1. Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha waxay tahay mid madax bannaan oo jirid iyo shakhsiyad qaanuuni leh.
2. Wakaaladdu waxay u haggaansami doontaa Sharcigan, Sharciyada iyo xeerarka soo socda ee Wakaaladaha:
   1. Sharciga Lam, 16 ee soo baxay 1dii Abriil 1970 iyo toosintii ka dambaysey ee Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

2. Sharciga Lam. 36 ee soo baxay 22kii Abriile 1972 ee ku saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa Bannaan.

3. Xeerka Lam. 74 ee 22kii Abriil ee shaqaalaha Wakaaladaha.

4. Sharciga Lamb. 58 ee soo baxay 31kii Luuliyo 1972 ee ku saabsan Lacagaha Wakaaladaha Madaxa bannaan.

Qodobka 3aad

Xarunta Wakaaladdu waxay ahaan doontaa Magaalada Muqdisho, waxaana ay yeelan doontaa Laamo Gobol kasta, haddii loo baahdo waxay ku yeelan doontaa Laamo Degmooyinka Jamhuuriyadda Dumuqraadiga Soomaaliya.

Qodobka 4aad

Ujeeddooyinka Wakaaladdu waxay tahay

1. In ay keligeed dibedda ka keento wax alla wixii alaab dhismo ah (tutti ed ogni genere di materiale di costruzione) iyo wixii la xiriira kara; hase yeeshee Wakaaladdu waxay u oggolaan kartaa fasax Hay'adda Dawladda oo ay ku keensan karaan alaab dhismo ee gaar ahaaneed ayadoo Wakaaladdu ka qaadaneyso khidmadeeda.

2. In ay iyadoo keliya Alaabta dhismaha ku qaybin karto dalka gudihiisa ha ahaado mid laamaheeda gadaan ama ay ku wareejiso Iskaashatooyin gaarsiisan heer Gobol ama Degmo.

3. In ay sicirka Alaabta u goyso Wakaaladdu; iyadoo raaci doonta Guddoonka Wasaaradda Ganacsiga kan Maaliyadda iyo oggolaansho Madaxtooyada.

4. In ay Wakaaladdu awood buuxda u leedahay kontaroolka ama baarista Iskaashatooyinka sicirka ay ku gadaan iyo habka ugu wacan ee ay ku gaarsiin karaan dadweynaha.

5. «Wixii ku saabsan Wakaaladda jaangooyadeeda, dhaqaalaheeda, horumarinteeda, hagaagsanaanta xisaabaadka, alaabta, xoolaha iyo ganacsiga, gadashada iyo sii gadidda Wasiirku wuxuu Wakaaladda ku leeyahay awood buuxda».

Qodobka 5aad

Wakaaladdu waxay awood u leedahay, iyadoo raacaysa Sharcigan, awood ay ku fuliso ujeeddooyinkeeda.

Qodobka 6aad

Ilaalinta Guud ee Wakaaladda.

1. Ilaalinta guud ee wakaaladda waxaa yeelan doona Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga,

2. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu siiyo awaamiir ama talooyin la xiriirta horumarinta shaqada markay sidaas ugu muuqato inay hagaajinayso Maamulka Wakaaladda.

Qodobka 7aad

Maareeye

1. Wakaaladda waxaa madax u noqon doona Maareeyaha guud waxaana lagu magacaabi doonaa Xeer uu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, isagoo tixgelinaya ra'yiga Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

2. Wakaaladdu waxay ka koobnaan doontaa Waaxyo ,xubno iyo Laamo.

Qodobka 8aad

Hawsha Maareeyaha uud

1. Maareeyaha guud waxaa loo xilsaaray, isagoo masalaaya Wakaaladda, fulinta ujeeddooyinka ku xusan qodobka saddexaad ee Xeerkan, hawshiisuna waxay tahay:

a) Inuu saxiixo heshiisyada ay Wakaaladdu dhinac ka tahay;

b) Waxa uu mas'uul ka noqon doonaa habka maamulka shaqada Wakaaladda, wuxuuna awood u yeelan doonaa inuu sameeyo wixii go'aan ah ee ku saabsan maamulka iyo canaanta shaqaalaha Wakaaladda isagoo raacaya sida ay farayaan Sharciyada;

t) Inuu ka mas'uul noqdo lacagta iyo hantida Wakaaladda; isagoo raacaya sharciyada dalka;

j) Inuu ku shaqeeyo wixii go'aan ah oo degdeg ah, asagoo isla markaa ogeysiinaya Wasiirka Wakaaladda Ganacsiga;

x) Inuu bixiyo wixii amar lagama maarmaan ah si hawsha maamulka guud iyo xisaabuhu ay hab fiican ugu socdaan;

kh) Inuu fuliyo wixii hawl— maamulka shaqada Wakaaladda ee caadi ah;

d) Inuu fuliyo wixii hawl ah oo la xiriira maamulka Wakaaladda aan caadi ahayn; isagoo ka haysta oggolaansho qoraal ah Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

2. Marka uu shaqada ka maqnaado Maareeyaha Guud ama ay jiraan sababo ka reebi kara shaqada, waxaa uu u magacaabi doonaa Ku—Sime sarkaal ka tirsan Waaxyaha Wakaaladda isagoo ka haysta oggolaansho Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

## Qodobka 9aad

## Xuquuqda Dhaqaalaha ee Shaqaalaha Wakaaladda

Xuquuqda qaynuuni ah iyo tan dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud Agaasimayaasha Waaxyaha iyo Shaqaalaha kale ee Wakaaladda, waxaa xukumi doona Xeerka Lam. yahay 36, soona baxay 22kii Abriile 1972 ee ku saabsan Shaqaalaha Wakaaladaha Madaxa bannaan.

## Qodobka 10

## Qorriinka Shaqaalaha

Wakaaladdu waxay qoran kartaa shaqaalaha ay u baahan tahay ayadoo raacaysa sharciyada u dhigan qorista shaqaalaha dalka.

## Qodobka 11aad

Raasamaalka Wakaaladda Ganacsiga Alaabta Dhismaha wuxuu ka booban yahay:

1. Alaabta Hay'adda M. Dawladda leedahay oo ku qornaa sharciga Lam. yahay 18 soona baxay 1.2.1973.
2. Wixii lacag ah ee gala hawsha ay qabato Wakaaladdu.
3. Wixii lacag kayd ah ee sannad kasta u dhiganta Wakaaladda (Riserved Fund).
4. Wixii hanti ah ee ka soo gala Wakaaladda deeq ama si kale.

## Qodobka 12aad

## Miisaaniyadda Wakaaladda

1. Maareeyaha guud marka ay tahay 30ka Oktoobar ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu isku dubbaridaa Miisaaniyadda ku saabsan sannadka Maaliyadda soo gelaysa, isagoo Faahfaahinaya kuna muujinaya lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Wakaaladda sannadka soo socda, wuxuuna hordhigi doonaa si loo oggolaado Wasiirka Wasaaradda lacagta iyo Wasaaradda Ganacsiga.

## Qodobka 13aad

## Xidhitaanka Miisaaniyadda

1. Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horreysa sannad kasta waa inuu diyaariyo, iskuna dubarridaa xiritaanka Miisaaniyadda sannadka la so dhaafay, isagoo isku hagaajiyey xisaabtii sannadkaa iyo bandhiggii macaashka iyo Wakaaladda, isla markaana u gudbiyo Wasiirka ganacsiga iyo tan Maaliyadda.

Qodobka 14aad

Amaah Sharci ah

Wakaaladdu iyadoo haysata guddoonka Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga wax waa ka amaahan kartaa mu'aasadaha amaahda ee dibedda iyo Bankiyada Gudaha si ay u hirgeliso xilka la saaray ama ujeeddooyinkii Wakaaladda.

Qodobka 15aad

Xeearka Guud.

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, wuxuu goddomiyi doona Xeer Guud ee Wakaaladaha xukuma oo lagu Faahfaahiyo Sharcigan.

Qodobka 16aad

Sharcigani si deg-deg ah ayuu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

*Muqdisho, 22 Nofembere 1976*

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga
ee Soomaaliya
*(Jaalle Maxamed Siyaad Barre).*

**XEER Madaxweynaha J. D. S. 7 Juunyo 1976 Dallacaad Jaale gaashaanle Xasan Axmad Iimaan, oo ka tirsan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. L. 30**

ASAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ASAGOO TIXGELIYEY: Hawlihii qaayaha lahaa oo uu soo qabtay Jaalle Gaashaanle Xasan Axmed Imaan;

ASAGOO DHEGAYSTAY: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Arrimaha Gudaha;

ASAGOO ARKAY: Sharciga lambarkiisu yahay 2, ee 23.12.1972 Dhismaha Ciidanka Booliiska;

ASAGOO ARKAY: Ogolaanshihii Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya; hawlihii qaayaha lahaa ee uu soo qabtay

ISAGGO TIXGELIYEY: dhageystayna taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Wuxuu Xeeray

Qodobka 1aad

In marka laga bilaabo 1da Juunyo 1976, la dallacsiiyey Sarkaalka hoos ku magacaaban, lana gaarsiiyey darajada hortiisa ku qoran:

1. Jaalle Gaashaanle Xasan Axmed Iimaan — Gaashaanle Dhexe.

Qodobka 2aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan galayaa, waxaana lagu dhigi doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 7 Juunyo 1976.

*MADAXWEYNAHA J.D.S.*
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA*
*(Jaalle S. Gaas Jaamac Maxamed Qaalib)*

XEER Madaxweynaha J. D. S. 12 Setember 1976 Shaqo ka fariisi Jaale G/Sare Maxamad Jaamac Belel. L. 31

ISAGOO ARKAY: Xaashidii 1aad iyo tii 2aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY: Qodobka 19aad xubinta 1aad xarafka (d) ee sharciga 14aad ee 4.1.1973 ee dhismaha Ciidanka Booliiska;

ISAGOO ARKAY: Shareiga 6 ee 31.12.1969 kuna saabsan xaqa iyo abaalgudka Ciidamada Qalabka Sida (Pension & Cratuity);

ISAGOO ARKAY: Taladii uu soo jeediyay Taliyaha Ciidanka Booliiska;

ISAGOO TIXGELIYEY: Ogolaanshihii Madaxtooyada Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya ee ku qornayd warqada lambar JDS/WXM/13 — 20.76, taariikhdeeduna ahayd 28.8.1976;

ISAGOO AQOONSADAY: In Sarkaalkaas hoos ku magacaaban shaqada laga fadhiisiyo markii la ogolaaday arjigii uu ku soo weydiistay.

ISAGOO DEGEYSTAY: Ra'yigii Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

WUXUU XEERAY

Qodobka 1aad

In Sarkaalka hoos ku magacaaban oo ka tirsan Ciidanka Booliiska shaqada laga fadhiisiyo marka laga billaabo taariikhda hortiisa ku qoran, markii laga ogolaaday arjigii uu ku soo weydiistay.

1. Gaashaanle Sare Maxamed Jaamac Delel — 1 Settembre 1976.

Qodobka 2aad

Sarkaalkaasu wuxuu xaq u yeelan doonaa wixii xaq ah ee uu siiyo sharciga 6 ee 31.12.1969 ee xaqa iyo abaalgudka Ciidamada Qalabka

Qodobka 3aad

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 2 Setembre 1976.

*MADAXWEYNAHA J.D.S.*
*(Jaalle S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)*

*Wasiirka Arrimaha Gudaha*
*(Jaalle S. Gaas Jaamac Maxamed Qalib)*

*MAXKAMADDA GOBOLKAK BENAADIR*

HADUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: waxay ku saabsan ahay iyo ogeysiiska Bangiga;

HADUU ARKAY: qod. D.L.9.9.65 N. 2; iyo lumidda Jeegga wareega Lambarkiisuna yahay 045667 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta 2aad ee Xamar; oo ay ku qorantahay sh so. 50.000/.

*WUXUU AMRAYAA*

In loo cusbooneysiiyo Jeeg Wareega ka dib markii ay ka soo wareegto 15 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

*WAXAA LA CODSANAYAA*

In Jeeg W. cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Cabdullaahi Cali Rooble ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo lasugaayo mudada 15ka maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho 30.11.75

GUDDOOM. MXKA. GOBOL. BENAADIR
*(Cabdullaahi Daahir Barre)*

*(L. 57)*

Ogeysiis: Ka soo qeeybgal shirweynaha Sharkadda Koju (Cogiu)

Waxaa la ogeysiinayaa Dhamaan Saamileyda ka mid ah Sharikadda Koju (Cogiu) ee fadhigeedu yahay Kismaayo.

In Shirweeynihii kowaad ee Sanadkii 1976 lagu qabanaoono Xarunta Sharikadda ee Degmada Kismaayo, Tariikhdu markey tahay 31da Jennaayo 1977, hadii uu suuragal noqonwaayo Fadhiga hore, kan Labaad wuxuu noqondoonaa 15ka Febraayo 1977, isla Xarunta shirkadda Shirarkaas waxaa la qabandoonaa kan hore Saacaddu markey tahay 20.00 (8) Fiidnimo 31da Jennaayo 1977, kan labaadna 8 Saac ee Fiidnimo ee 15ka Febraayo 1977.

Arrimaha laga doodi doono

1. — Miisaaniyadda Sanadda 1976

2. — Doorashada Guddiga Maamulka Sharikadda

3. — Hawlaha Sharikadda

4. — Wixii kale oo la xiriira danaha Shirkadda

Kismaayo 28.11.1976

*Guddoomiye Xigeenka Shirkadda Koju*

*Jaalle Cabdi Maxamed Cali*

*(L. 58)*

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: dacwadda kor ku qoran;

HADDU ARKAY: waxay ku saabsan tahay iyo ogeysiiska Bankiga

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 D.L.L.9.9.65 N. 2; iyo lumidda Bugga keydka Lam. 786 ee Bankiga Ganacsiga Ummadda Laanta

Afaraad (Libeeto niminativo) oo ku qornay Sh.SO. 1.200 (Kunlababoqol)

WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo Buug kayd kaddib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXAA LA CODSANAYAA

In Buug kayd cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro Jaalle Dachir Sulub Ismaaciil ama qof isla isaga ka sita Wakaalad Sharci ah, ayadoo la sugaayo muddada 30 ka maalmood ah ee aan kor kur soo sheegnay.

Muqdisho, 1.11.76

GUDDOOMIYAHA MAX. GOB. BANAADIR

*Saxiixa (Cabdullaahi Dachir Barre*

L. 59